



## Seattle City Light

**Seattle City Light**, waa hay'ad dawlaadeed ee ku hawl leh adeegga tamarta. Waxayna siisaa dadka guryaha deggan iyo ganacsatada Seattle iyo xaafadaha la deriska ah, adeeg koronto oo qiime jaban. Hay'adda City Light waxay ka tirsan tahay hay'adaha dalka ee horseedka ku ah tashiilida isticmaalka tamarta iyo dhawrista bey'adda.

City Light waxay bixiyaan adeegyada tooska ah ee soo socda:

- Macluumaadka iyo adeegga macaamilka: furitaanka iyo xiritaanka xisaabta, biilasha, gargaarka lacag bixinta, furitaanka adeegga cusub, dhibaatooyinka adeegga
- Korontada go'da iyo macluumaadka ammaanka korontada
- Dayactirka nalalka waddooyinka
- Geed jaridda agagaarka fiilooyinka korontada quwadda badan
- Macluumaadka sida tamarta loo kaydiyo iyo siyaalaha loo dhimo isticmaalka korontada; waxyaabaha dhiirgeliya kaydinta korontada
- Iibsashada tamarta "cagaarka" ee dib loo isticmaali karo

Nidaamka iyo waxyaabaha loo baahan yahay – marka lala xiriiro City Light:

- Waxaad wacdaa **206-684-3000** si aad xisaab u furato/xirto, aad u codsato gargaar lacag bixineed, aad wax ka weydiiso biilasha, iyo si aad u bixiso biilasha. Waxaad biilashaada bixisaa inta aan la gaarin taariikhda lagaa doonaayo ama ina soo wac si aad u sameeyso qorshe aad biilashaada ku bixiso.
- Foorjariga/khayaanada xisaabta. Taxaddir yeelo. Taleefoonka ha ku bixin macluumaadka xisaabtaada haddii uu qof ku soo waco. City Light taleefoonka ma ay kugu weydiinayaan macluumaadka kaarkaaga amaahda. Haddii uu qof ku soo waco, waxaad weydiisaa magacooda iyo lambarka taleefoonkooda si aad u wacdo. Waxaad si dhaqsi leh u soo wacdaa City Light si aad wax inooga sheegtid taleefoonkii lagu soo diray. Waxaannu hubin karnaa macluumaadka xisaabtaada.
- Waxaad wacdaa **206-684-3020** haddii qof reerkaaga ka tirsan uu qabo xaalad caafimaad ee u baahan korontada si ay u shaqeeyaan qalaka nololaha taageera.
- Waxaad wacdaa Seattle City Light haddii aad iska beddeleyso adeegga korontada ee gurigaaga ama goobta ganacsigaaga. Haddii aad ku taal Waqooyiga Denny Way: Waxaad wacdaa **206- 615-0600**; Koonfurta Denny Way: Waxaad wacdaa **206-386-4200**
- Waxaad wacdaa **206-706-0051** si aad u soo wargeliso xaalado degdeg ah sida geedo ku dhacay fiilooyinka qaada korontada quwadda badan ama ay dhimbilo ka baxayaan fiilooyinka korontada.
- Waxaad wacdaa **206-684-7056** si aad u soo wargeliso nalalka waddada ku yaal ee jaban ama aan shaqeynin. Waxaad inoo sheegtaa cinwaanka u dhow tiirka/baallaha, iyo lambarrada midabkooda yahay madow iyo huruud ee ku yaal tiirka/baallaha.
- Waxaad wacdaa **206-684-7400** si aad u soo wargeliso korontada go'do.

Dadka (xafiisyada) hore ee lala xiriiro

<p><b>Lacagta biilka Seattle City Light waxaad u soo dirtaa:</b> City of Seattle Department of Finance PO Box 34017 Seattle, WA 98124-1017</p> <p><b>Waxaad lacagta ku bixin kartaa internetka 24 saac/maalintii cinwaanka:</b> <a href="http://www.seattle.gov/light/accounts/onlinepayment.asp">www.seattle.gov/light/accounts/onlinepayment.asp</a></p>	<p><b>Xarunta Adeegga Macaamilka</b> 206-684-3000 (Marka laga soo wacaayo meel deegaanka ka baxsan) 1-800-862-1181 (TTY dadka hadalka ama maqalka ka culus) 206-233-7241 Faakiska: 206-684-5637</p> <p>Saacadaha Shaqada: Isniinta – Jimcaha, 7:30 subaxnimo illaa 6 habeenimo</p> <p><b>Lacagta biilka ee lagu bixiyo kaarka amaahda (24 saac/maalintii) 1-866-873-0944)</b></p>
<p><b>Goobaha ay ku yaalliin Xarunta Adeegga City Light ee lacagta laga bixiyo</b> Isniinta-Jimcaha, 8-da subaxnimo 5-ta galabnimo.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Xarunta Adeegga Waqooyiga 1300 N. 97th Street, Seattle</li> <li>• Xarunta Adeegga Koonfurta 3613 4th Avenue S., Seattle</li> </ul> <p>Sanduuqyada lagu rido ayaa ku yaal labada meel.</p>	<p><b>Goobaha lacag bixinta ee Key Tower</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• 700 5<sup>th</sup> Avenue, 27<sup>th</sup> Floor Seattle, WA Isniinta-Jimcaha, 8-da subaxnimo 5-ta galabnimo.</li> <li>• 700 5<sup>th</sup> Avenue, Room 4250 Isniinta-Jimcaha, 8-da subaxnimo 5-ta galabnimo.</li> </ul> <p>Sanduuqyada lagu rido: dabaqa 4-aad halka laga soo galo iyo banaanka 6th Avenue ee Cherry Street</p>
<p>Haddii aad dood ka qabtid biilka, waxaad <b>warqad</b> u soo dirtaa: Seattle City Light Attn: Account Services, Room 2802 PO Box 34023 Seattle, WA 98124-4023</p>	<p><b>Bogga Internetka ee City Light:</b> <a href="http://www.seattle.gov/light">www.seattle.gov/light</a></p> <p><b>Emailka City Light:</b> <a href="mailto:respond.scl@seattle.gov">respond.scl@seattle.gov</a></p>
<p><b>Xafiiska Mas'uulka City Light</b> 206-684-3200</p> <p><b>Isgaarsiinta &amp; Xiriirka Dadweynaha</b> 206-684-3090</p>	<p><b>Xarumaha Adeegyada Xaafadda:</b> Oo ku kala yaal xaafado kala duwan. Waxaad wacdaa 206-684-CITY si aad u heshid cinwaan gaar ah. <a href="http://www.seattle.gov/neighborhoods/nsc/">www.seattle.gov/neighborhoods/nsc/</a></p>